DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

# Deeqda Waxbarashada ee xiliga hore ee waxbarashada - Codsiga Pathway II

## Tilmaamaha

### Waa maxay Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka?

Deeqda waxbarashada ee waxbarashada dhallaanka ee waxbarashada - Pathway II waxay ilmahaaga ka caawin kartaa inuu xaadiro xanaanada carruurta ee tayada sare leh iyo waxbarashada xiliga hore si loo hubiyo in ilmahaagu galo rowdada uuna u diyaarsanaado inuu guul ka keeno. Barnaamijku wuxuu xaq u yeelanayaa inuu helo maalgalinta Pathway II haddii uu yahay mid Parent Aware ay Afar xidigood ku Qiimaysay. Parent Aware waa aalad wax lagu qiimeeyo oo waalidiinta ka caawisa inay doortaan barnaamijyada waxbarashada carruurta xiliga hore ee tayada sare leh. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo mareegta Parent Aware (ParentAware.org).

**Fiiro gaar ah:** Carruurtu waxay heli karaan kaliya hal deeq waxbarasho inta u dhexaaysa Luulyo 1deeda iyo Juun 30keeda sannad walba mana heli karaan deeqda waxbarashada Pathway I iyo Pathway II isla xiligaas.

### Halkee ayuu ilmahaygu u isticmaali karaa deeqda waxbarashada?

Deeqaha waxbarashada ee waxbarashada xiliga hore - Pathway II waxaa la siiyaa qoysaska u qalma waxaana siiya barnaamijyada ay Parent Aware ku Qiimayso Afarta Xidigood. Barnaamijyada xiliga hore ee carruurta ee Pathway II waxay maalgalin ka helaan Minnesota Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota). Barnaamijyadaanu waxay intaas kaddib maalgalinta u isticmaalaan inay ku bixiyaan deeqaha waxbarashada ee ay siinayaan qoysaska carruurtoodu dhigato barnaamijka Pathway II. Deeqaha waxbarashada waa in loo isticmaalaa barnaamijka Pathway II ee lagu abaalmariyay. Maalgalintu waxa ay kasii jiraysaa barnaamijka si loogu caawiyo carruurta kale haddii ilmahaagu baxo.

### Waa maxay shuruudaha u qalmiddu?

1. **Da’da:** Carruurtu marka ay dhashaan ilaa da'da 4 sanno ayaa u qalma, carruurta 5 sanno jirka ah ayaana u qalma haddii ay 5 sanno jirsadaan Sebtambar 1deeda kaddib sannad dugsiyeedka markaas lagu jiro. (Carruurta da'doodu way ka baxaysaa u qalmitaanka haddii ay 5 sanno jirsadaan Sebtambar 1deeda ama ay ka diiwaangashanyihiin oo ay dhiganayaan rowdada, hadba kii soo hormara.)
2. **Ciwaanka:** Waa in ilmuhu degenyahay Minnesota (uu leeyahay ciwaan Minnesota ah.)
3. **Dakhliga:** Waa in qoysku leeyahay dakhli ka yar ama lamid ah 85 boqolkiiba Celceliska Dakhliga Gobolka (SMI) ama uu qaato kaalmo uu ka heli barnaamij gobolku u ogolaaday ama federaalku maalgaliyo.

**Ka eeg hagitaanada shuruudaha u qalmitaanka dakhliga ee ku qoran bogga13.**

## Bulshada Muhiimada la siinayo

Carruurtu waxay helayaan muhiimad siinta maalgalinta Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka haddii ay buuxiyaan mid kamid ah ama ka badan shuruudaha soo socda. Qoysasku waa inay sidoo kale buuxiyaan shuruudaha dakhliga si ay ugu qalmaan, in hoos lagu xuso maahane.

- Ay ku jiraan xanaanada barbaarinta ama ay haystaan waalid/mas'uul kaasoo ku jira xanaanada barbaarinta ee balaaran ilaa da'da 21 sanno (dukumiinti dakhli loogama baahna).
- Loo soo gudbiyay inay u baahanyihiin adeegyada difaaca carruurta (dukumiinti dakhli loogama baahna).
- Ay leeyihiin waalid ka yar da'da 21 sanno kaasoo dhiganaya shahaadada dibloomada dugsiga sare ama GED.
- Wajaheen hoy la'aan 24kii bilood ee lasoo dhaafay.
- Waalidkood hadda ku jiro xabsi, jeel, xarun dadka lagu xiro ama isha lagu hayo.
- AY ku jiraan ama waalidkood uu hadda ku jiro barnaamijka daaweynta isticmaalka maandooriyaha.
- Ay ku jiraan ama leeyihiin waalid hadda ku jira barnaamij lagula tacaalo caafimaadka dhimirka.
- Wajaheen xadgudubka qoyska dhexdiisa ah.
- Wakhti xaadirkan waxaad haysataa barnaamijka waxbarashada shakhsiyeed (IEP, da'da 3 ilaa 5) ama qorshaha adeegga qoyska ee gaarka ah (IFSP, da'da dhalashada ilaa 3).

Intaas waxaa dheer,

- Marka carruurtu dhashaan ilaa da'da 3 sanno waa in laga doorbidaa kuwa ka weyn 4ta sanno.
- Carruurta qoysaskoodu ku jiraan ama ka hooseeyaan 47 boqolkiiba Celceliska Dakhliga Gobolka (SMI) waa in laga doorbidaa qoysaska dakhlgoodu sareeyo (Laga bilaabo Luulyo 1-deeda, 2025).

## Sideen u Codsadaa Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka?

1. Ku buuxi codsiga khadda buluuga/madowga ah ama si elektoroonik ah. Macluumaadka waajibka ah waxaa lagu calaamadeeyay xidig (*).
   - Haddii ilmuhu ku jiro xanaanada barbaarinta, wakaaladda adeegga bulshada ee ismaamulka ama qabiilka waa in la buuxiyaa lana saxiixaa codsiga. Waalidka xanaanadu si toos ah uma codsan karo deeqda waxbarashada.
2. Waxaa halkaan ku lifaaqan dukumiintiyo muujinaya u qalmitaankaaga. Eeg Bogga 6aad si aad u ogaato shuruudaha Xulashada 1aad (cadaynta ka qyabqaadashada barnaamijka bulshada loo maalgaliyo) ama Bogga 7 Xulashada 2aad (cadaynta dakhliga).
   - Haddii uu ku codsanayo qaybta u qalmitaanka waalidka ka yar da'da 21 sanno, codsaduhu waa inuu keenaa cadayn qoraal ah oo ah in waalidku dhigto dibloomada dugsiga sare ama GED® asagoo ku muujinaya waraaqda ururka waxbarashada ee bixinaya koorsada(sooyinka) waxbarashada waalidku dhiganayo.
3. Waa inuu akhriyo Heshiiska si uu ugu Hogaansamo Shuruudaha iyo Digniinaha Tennessen.
4. Saxiix oo taariikh ku qor codsiga khadda buluuga/madowga ah ama saxiixa elektorooniga ah.
5. Soo gudbi codsigaaga asalka ah ee barnaamijka Pathway II adigoo raacaya tilmaamaha laguugu siiyay salka hoose ee Liiska hubinta Codsiyada ee bogga kan xiga.

*Foomkaan waxaa abuuray Gobolka Minnesota waana inaan wax laga badalin oo aan sinnaba wax dib u qaabayn ah lagu samayn.*

Maalgalinta waxaa bixinaya Gobolka Minnesota si uu gacan uga gaysto maamulista deeqaha waxbarashada xiliga hore, Xeerarka Minnesota, farqada [142D.25.]

## Liiska Waxyaabaha La hubinaayo

**Dib u eeg liiska waxyaabaha la hubinayo ee hoose si aad u hubiso inaad haysato wax walba oo aad u baahantahay oo codsigaaga ku saabsan:**

- Buuxi dhammaanba qaybaha waajibka ah ee codsiga. Waxyaabaha lagu calaamadeeyay xidigta (*) waa waajib. Dhammaanba macluumaadka kale waa ikhtiyaari.
- Ku buuxi foomkaan khadda buluuga/madowga ah ama si elektoroonik ah.
- Si taxaddar leh u akhri layn kasta oo kamid ah qaybta **Heshiiska U Hogaansanta Shuruudaha** iyo **Digniinta Tennessen**.
- Ku saxiix oo taariikhee codsiga khadda buluuga/madoowga ah ama si elektoroonik ah.
    - *Ikhtiyaari ah:* Akhri heshiiska si aad uga qaybqaadato qiimaynta waxaadna qortaa magacaaga si aad ogolaansho u bixiso.
- Diyaarso dhamaanba dukumiintiyada xoojinaya so aad ugu kabto codsiga. Dukumiintiyada xoojinaya waxaa ku jira:
    - Xulashada 1aad: Dukumiintiyada muujinaya ka qyabqaadashada hadda oo ku jira mid kamid ah barnaamijyada bulshada ee la ogolaaday ee ku qoran Bogga 6.
    - Xulashada 2aad: Dukumiintiyada dakhliga oo lla socda Xulashada 2aad *Dadka waaweyn ee Qoyska iyo Dakhligooda* ee Bogga 7 ee codsiga.
        - Haddii mid kamid ah xubnaha dadka waaweyn ee qoyskaagu leeyahay wax dakhli ah, *foomka Bayaaminta Dakhli la'aanta Qoyska* ee ku jira Bogga 8aad ayaa loo baahanyahay in uu buuxiyo mid kamid ah dadka waaweyn laguna soo daro codsigaaga.
    - Haddii aad tahay waalid dhowr iyo toban jir ah oo ka yar da'da 21 sanno aadna dhigto dibloomada dugsiga sare ama GED®, waa inaad keentaa cadayn qoraal ah oo ku saabsan inaad dhigato dibloomada dugsiga sare ama GED® adoo ku muujinaya waraaqda ururka waxbarashada ee bixinaya koorsada(sooyinka) waxbarashada aad dhigato.
- Soo gudbi codsi dhamaystiran, saxiixan oo lagu soo lifaaqay dukumiintiyada u qalmitaanka barnaamijka Pathway II ee hoos ku qoran.
- Hayso ugu yaraan hal koobi oo codsiga iyo lifaaqyada ah si aad u kaysato.

## Soo gudbi Codsiga

**Soo gudbi codsigaaga buuxa iyo dukumiintiyada u qalmitaanka ee barnaamijkaaga Pathway II.** Fadlan codsiga ha u dirin Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska).

**Barnaamijyada Pathway II waa in lagu bixiyaa ciwaanka boostada iyo macluumaadka xiriirka ee hoose.**

Magaca Barnaamijka Pathway II: ______________________________________________

Pathway II magaca xiriirka: ____________________ Pathway II iimaylka xiriirka: ________________________

Ciwaanka: ____________________________________ Teleefoonka: ______________________

*Dukumiintiyada maqan sida cadaynta ka qaybqaadashada barnaamijka ama dakhliga, ama saxiixa maqan wuxuu keeni karaa dib u dhac.*

*Boggaan si ogaal ah ayaa looga tagay asagoo banaan.*

DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

**Bokiska waxaa loogu talagaya Isricmaalka Maamulaha oo Kaliya:**

Magaca Barnaamijka: ________________________

Codsiga Maaliyadda Sannadka: ________________

# Deeqda Waxbarashada ee xiliga hore ee waxbarashada - Codsiga Pathway II

Ku buuxi foomkaan khadda buluuga/madowga ah ama si elektoroonik ah. Macluumaadka wata xidigta (*) waa waajib in uu buuxiyo waalid/mas'uul. Haddii su'aalo waajib ah laga tago ayagoo banaan, waalidka/mas'uulka waxaa looga baahan doonaa inuu saxo codsiga.

Haddii ilmahaagu ku jiro xanaanada barbaarinta, shaqaalahaaga kiiska xanaanada barbaarintu waa inuu codsiga diraa asagoo ilmahaaga ka wakiil ah. Waalidiinta xanaanadu si toos ah uma codsan karaan deeqda waxbarashada.

## Macluumaadka Ilmaha

Macluumaad ka bixi dhammaanba carruurta aad doonayso in deeqda waxbarashada loo tixgaliyo; **dhammaanba carruurta xiliga ay dhashaan ilaa da'da 4 sanno jirka waa ay u qalmaan**. U isticmaal codsi gaar ah carruurta ku nool goobaha kale. Walaaluhu waa carruurta wadaaga mid kamid ah ama labada waalidba dhiig ahaan, guur ama korsasho, waxaana kamid ah walaalaha sida ku qeexan xeerka ama caadada qabiilka carruurta.

**Fiiro gaar ah:** Carruurta 5 sanno jirka ah ama kasii weyn Sebtambar 1deeda sannad dugsiyeedka markaas la joogo uma qalmaan inay deeqda waxbarashada helaan.

### Ilmaha Kow

*Magaca Sharciga ah ee Ilmaha: ______________________________________________

*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha (BB/MM/SSSS): ______________________________

*Jinsiga Ilmaha (mid calaamadee): ◯ Lab ◯ Dheddig

Ilmahaan miyuu ku jiraa Xanaanada Barbaarinta?: ◯ Haa ◯ Maya

Isirka (*mid calaamadee*): ◯ Hispanic/Latino ◯ Hispanic/Latino Aan ahayn

*Qolada (calaamadee dhammaan inta ku habboon)*
- ☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaskaanka
- ☐ U dhashaya Jasiirada Baasifiga ama Dhaladka reer Hawai
- ☐ Aasiyaan
- ☐ Caddaan
- ☐ Madoow ama Afrikaanka Mareykanka

Ilmahaan miyuu helay Baaritaanka Carruurnimada Hore? ◯ Haa ◯ Maya

*Haddii ay haa tahay:* Goobta: ________________________________________ Taariikhda: _________________

### Carruur Dheeraad ah

Ma waxaad u codsanaysaa in ka badan laba canug? ◯ Haa ◯ Maya

*Haddii aad u codsanayso in ka badan hal canug, isticmaal bogga dheeraadka ah ee dhamaadka codsiga.*

## Macluumaadka Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah

**Waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee carruurta ee ku jira codsigaan waa inuu qaybtaan buuxiyaa.**
**Fiiro gaar ah:** Haddii ilmo carruurta kamid ah uu ku jiro xananaada barbaarinta, fadlan ka bood qaybtaan waxaadna buuxisaa qaybta "Macluumaadka Daryeelka Xananaada."

*Magaca Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah: ________________________________________
*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*
*Ciwaanka Deegaanka: ______________________________ Guriga/Qaybta #: __________

*Magaalada: ______________ *Gobolka: _____ *Furaha deegaanka: ________ Ismaamulka: ____________

*Xiriirka kala dhexeeyo ilmaha: ◯ Waalid ◯ Mas'uulka Sharciga ah (waxaa magacawday maxkamadda)

Mid kale: ________________________________________

Lambarka Teleefoonka: ______________ Ciwaanka Iimaylka: ______________________________

Ma ogoshahay inaad fariin qoraal ah ka hesho barnaamijkaaga/maamullahaaga? Khidmadaha fariimaha/internetka ayaa lagu dabaqi karaa. ◯ Haa ◯ Maya

Ciwaanka Boostada (haddii uu ka duwanyahay ciwaanka guriga): ______________________________

Magaalada: ______________ Gobolka: ______ Furaha deegaanka: ________ Ismaamulka: ____________

### Xiriirka Dheeraadka ah 1

Haddii uu jiro xiriir kale sida waalid/mas'uul kale, xubin kale oo qoyska ah, shaqaalaha kiiska, shaqaalaha barnaamijka, tarjumaanka, ama qof kale oo weyn ee aad rabto inada codsigaaga ku darto, halkaan ku qor. Haddii ay jiraan laba waalid/mas'uul, waalidka/mas'uulka labaad waa in halkaan lagu qoraa. Markii aad qofkaan qorto, waxaad Maamulaha Deeqda waxbarashada u ogolaanaysaa inuu la xiriiro qofkaan weyn si uu ugala hadasho macluumaadka foomkaan ku jira.

Magaca: ________________________________________
*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*
Ciwaanka Guriga: ______________________________ Guriga/Qaybta #: ______________

Magaalada: ________________ Gobolka: ______ Furaha deegaanka: ______ Ismaamulka: ____________

Lambarka Teleefoonka: __________________ Ciwaanka Iimaylka: ______________________________

Ma ogoshahay inaad fariin qoraal ah ka hesho barnaamijkaaga/maamullahaaga? Khidmadaha fariimaha/internetka ayaa lagu dabaqi karaa. ◯ Haa ◯ Maya

Xiriirka kala dhexeeyo ilmaha/carruurta: ________________________________________

### Xiriirka Dheeraadka ah 2

Ikhtiyaari ah: Haddii uu jiro xiriir kale sida xubin kale oo qoyska ah, shaqaalaha kiiska, shaqaalaha barnaamijka, tarjumaanka, ama qof kale oo weyn ee aad rabto inada codsigaaga ku darto, halkaan ku qor. Markii aad qofkaan qorto, waxaad Maamulaha Deeqda waxbarashada u ogolaanaysaa inuu la xiriiro qofkaan weyn si uu ugala hadasho macluumaadka foomkaan ku jira.

Magaca: ________________________________________
*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*
Ciwaanka Guriga: ______________________________ Guriga/Qaybta #: ______________

Magaalada: ____________________ Gobolka: ______ Furaha deegaanka: ______ Ismaamulka: ________

Lambarka Teleefoonka: __________________ Ciwaanka Iimaylka: ______________________________

Ma ogoshahay inaad fariin qoraal ah ka hesho barnaamijkaaga/maamullahaaga? Khidmadaha fariimaha/internetka ayaa lagu dabaqi karaa. ◯ Haa ◯ Maya

Xiriirka kala dhexeeyo ilmaha/carruurta: ________________________________________

Haddii aadan u codsanayn ilmo ku jira adeegyada difaaca iyo/ama xananaada barbaarinta, ka bood boggaan.

## Waxyaabaha ku saabsan Ilmaha Ku jira Adeega Difaaca

Haddii ilmahaagu uusan helin adeegyada difaac carruurta, ka gudub qaybtaan ayadoo banaan.

Wakaaladda Soo gdbinaysa: ________________________________ Taariikhda: ______________________________

Magaca Shaqaalaha Soo gudbinaya: ____________________________ Jagada: _______________________________

Lambarka Teleefoonka: _______________________ Ciwaanka Iimaylka:______________________________________

## Macluumaadka Xananaada Barbaarinta

**Qaybtaan waa inuu buuxiyaa shaqaalaha ka socda adeega bulshada ee ismaamulka ama qabiilka xananaada barbaarintu ku dhex taalo.**

Markii aad qaybtaan buuxiso, waxaad iska dhigaysaa inaad tahay halka uu la soo xiriirayo barnaamijka Pathway II haddii loo baahdo in lagaala hadlo macluumaadka foomkaan ku jira. Shaqaalaha wakaalada adeega bulshada ee ismaamulka ama qabiilku waa inuu barnaamijka Pathway II ku wargaliyaa haddii ay jiraan wax isbadalo ah oo saamayn ku yeelan kara deeqda waxbarashada.

Dhamaadka codsigaan, shaqaalaha wakaalada adeega bulshada ismaamulka ama qabiilku waa inuu u saxiixaa ka waalid/mas'uul ahaan.

Wakaalada Adeegga Bulshada ee Ismaamulka ama Qabiilka: __________________________________________

Ciwaanka Wakaaladda Adeegga Bulshada ee Ismaamulka ama Qabiilka:_______________________________________

Magaca Shaqaalaha: ______________________________________________________________________________

Lambarka Teleefoonka: _________________________ Ciwaanka Iimaylka: ___________________________________

### Deegaanka Ilmaha

Ciwaanka Deegaanka ee Hadda: _____________________________________ Guriga/Qaybta #: __________________

Magaalada: _____________________ Gobolka: ________ Furaha Deegaanka: _________ Ismaamulka: _____________

**Degmada uu ku yaalo Dugsig** oilmuhu degenyahay ayadoo lagu salaynayo guriga ilmaha laga saaray:

_____________________________________________________________________________________________

### Xiriirka Waalidka Xananaada Barbaarinta

Magaca Waalidka Xananaada: ________________________________________________________________________

*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*

Lambarka Teleefoonka: ___________________________ Ciwaanka Iimaylka: _______________________________

## Waalidka ku jira Xanaanada Barbaarinta Balaaran ee Da'da ilaa 21 sanno

Haddii aadan ahayn waalid ku jira xanaanada barbaarinta ee balaaran, ka gudub qaybtaan ayadoo banaan. Haddii ilmahaagu ku jiro xanaanada barbaarinta, shaqaalihiisa kiisku waa inuu soo buuxiyaa codsiga.

Wakaaladda Soo gudbinaysa: _______________________________________ Taariikhda: __________________________

Magaca Shaqaalaha Soo gudbiyay: ____________________________________ Jagada: ____________________________

Lambarka Teleefoonka: __________________________________________ Ciwaanka Iimaylka: _____________________

# Macluumaadka Qoyska

**Carruurta Qoyska***

Qor dhamaanba ubnaha Qoyskaee ah **dhallaanka, carruurta, iyo ardayda gaartay oo ay ku jiraan fasalka 12aad,** oo ay ku jiraan carruurta codsigaan ku jirta. Eeg bogga 7-aad si ada u hesho qeexitaanada qoyska. Ha qorin dadka waaweyn ee ka weyn fasalka 12aad ee shaxdaan ku jira. Haddii meelo badan oo banaan loogu baahdo magacyo dheeraad ah, kusoo lifaaq waraaq kale oo dheeraad ah.

| **Magaca Koobaad ee Ilmaha** Qor dhamaanba carruurta qoyska oo ay ku jiraan carruurta deeqda waxbarashada codsanaysa. | **Magaca Dhexe** | **Magaca Ugu danbeeya ee Ilmaha** | **Da'da Ilmaha** |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**Waa maxay luuqadda qoyskaagu inta badan guriga uga hadlo?**

☐ Ingiriis ☐ Hmong ☐ Soomaali ☐ Isbaanish ☐ Fitnaamiis ☐ Mid kale:________________

**Miyaad u baahan tahay turjumaan?** ○ Haa ○ Maya

**Ma jiraa xubin kamid ah qoyskaaga oo xiriir la leh mid kamid ah kow iyo tobanka qabiil ee federaalku aqoonsan yahay ee Minnesota degen?** *Haddii haa tahay, calaamadee dhamaanba inta ku khusaysa. Haddii aysan jirin, ka gudub ayadoo banaan.*

☐ Bois Forte Band of Chippewa
☐ Fond Du Lac Band of Lake Superior Chippewa
☐ Grand Portage Band of Lake Superior Chippewa
☐ Leech Lake Band of Ojibwe
☐ Lower Sioux Indian Community
☐ Mille Lacs Band of Ojibwe
☐ Prairie Island Indian Community
☐ Red Lake Nation
☐ Shakopee Mdewakanton Sioux Community
☐ Upper Sioux Community
☐ White Earth Nation
☐ Mid kale: ________________

**Waa maxay heerka waxbarashada ugu sareeya ee aad gaartay?** *Mid calaamadee.*

○ Wax ka hooseeya dugsi sare ○ Dugsiga sare ama GED ○ Koleej ama digrii ○ Digriiga koleejka

**Waa maxay heerkaaga shaqo ee waqti xaadirkan?** *Mid calaamadee.*

○ *Shaqo buuxda haysta* (25 saacadood/todobaadkii ama ka badan)
○ Shaqo galin ah (in ka yar 25 saacadood/todobaadkii)
○ Bilaa shaqo ah, shaqo raadis
○ Bilaa shaqo ah, shaqo aan raadinayn

**Sidee ku heshay akhbaarta Deeqaha Waxbarashada Xiliga Hore?** *Calaamadee dhammaan inta ku habboon.*

☐ Barnaamijkayga
☐ Saaxiib/Qoys
☐ Qoys kale oo barnaamijkayga ka tirsan
☐ Maamulaha Aagga
☐ Shuraakadda bulshada (sida, maktabadda)
☐ Baraha bulshada (Facebook, Twitter)
☐ Cilmi-baarista onlaynka ah
☐ Ogaalka Waalidka/Ogaalka Daryeelka Ilmaha
☐ Adeeg bixiyaha Qabiileed, Degmada, ama Gobolka
☐ Boorka/xayaysiinta
☐ Mid kale: ________________

Macluumaadka soo socda ayaa la codsaday sababtoo ah xaalado gaar ah ayaa ilmahaaga muhiimad siinaya deeqda waxbarashada xiligga hore. Inaad macluumaadkaan la wadaagto waa ikhtiyaari, waxayna kaliya faa'iido u yeelan kartaa codsiga ilmahaaga, loomana isticmaali karo in codsiga ilmahaaga lagu diido. Wixii tafaasiil dheeraad ah, eeg Hagaha Kaabaya Bulshada Muhiimadda la Saarayo ee ku jira [mareegta Deeqda Waxbarashada Dhallaanka](https://education.mn.gov/MDE/fam/elsprog/elschol/): https://education.mn.gov/MDE/fam/elsprog/elschol/

**Miyaa tahay waalid da'yar oo da'diisu ka yar tahay 21 oo hadana wax ka barto dibloomada dugsiga sare ama GED?**

○ Haa ○ Maya

Haddii ay haa tahay, Taariikhda Dhalashada (BB*/MM/SSSS)*: ______________________

*Kusoo lifaaq cadayn qoraal ah oo ku saabsan inada dhigato dibloomada dugsiga sare ama GED,® waraaqda ururka waxbarashada.*

**Waalidka, bixiyaha daryeelka aasaasiga ah, mas'uulka sharcga ah, iyo/ama canugu ma wajahayaa mid kamid ah waxyaabaha soo socda?** *Calaamadee inta ku habboon.*

- ☐ Waqti xaadirkan ku jira jeelka, xabsiga, xarunta dadka lagu hayo ama lagu sameeyo kormeer joogto ah
- ☐ Waqti xaadirkan ku jira barnaamijka daawaynta isticmaalka mukhaadaraadka
- ☐ Waqti xaadirkan ku jira barnaamijka daawaynta caafimaadka dhimirka
- ☐ Dhibaatooyinka Guriga
- ☐ Waqti xaadirkan waxaad haysataa barnaamijka waxbarashada shakhsiyeed (IEP, da'da 3 ilaa 5) ama qorshaha adeegga qoyska ee gaarka ah (IFSP, da'da dhalashada ilaa 3)

**Qoyskaagu ma wajahay wax kammid ah xaaladaha soo socda xili kamid ah 24kii bilood ee lasoo dhaafay (ay hadda ku jirto) sabab la xiriirta dhibaato dhaqaale ama waayitaan guri?** *Calaamadee inta ku habboon.*

- ☐ Hoy
- ☐ U guuraayo meel ilaa meel kale
- ☐ Gaari, Dibadda, ama goobaha dadwaynaha
- ☐ Si ku meelgaar ah u dulsaarnaanta qoys ama saaxiibo kale
- ☐ Hudheel, mooteel, guri kunteenar, ama barxadda kaamka (sababo la xiriira waayitaanka guriyeynta, dhibaatada dhaqaale, ama sabab la mid ah)

# Cadaynta U qalmitaanka Dakhliga

Qoysasku waa inay muujiyaan u qalmitaankooda dakhliga.

## Xulashada 1aad: Kaqaybqaadashada Barnaamijyada Bulshada

- Haddii aad kaga jawaabto **haa** mid ama ka badan su'aalaha 1 ilaa 7, **kusoo lifaaq dukumiintiga mid kamid ah barnaamijyadaada bulshada** codsigaaga.
- **Cadaynta ka qaybqaadashada ee la aqbali karo waxaa kamid ah:** ogaysiis rasmi ah oo ku saabsan waraaqda barnaamijka; codsiga ogolaanshaha/saxiixa barnaamijka (sida, codsiga CACFP ama FRPM oo la ogolaaday); foomka ogolaanshaha oo ka socda barnaamij bulsho; biilka ama boonada hadda ee barnaamijka (sida, MEC[2] biilka CCAP); ama sawirka shaashadda nidaamka rasmiga ah ee barnaamijka ee qoran (sida, macluumaadka cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee Infinite Campus). Cadaynta ka qaybqaadashadu waa inuu ku qoran yahay magaca waalidka/mas'uulka iyo/ama ilmaha(carruurta), waa in la taariikheeyaa, waana inuu shaqaynayaa wakhtiga abaalmarinta.
- **Cadaynta aan la aqbalayn waxaa kamid ah**: waraaqda sugitaanka, codsi aan la aqbalin, dukumiinti aan taariikh lahayn, iyo/ama dukumiinti wakhtigiisii dhacay.

| **Barnaamijka Bulshada**<br>Kusoo lifaaq barnaamijka **mid kamid ah barnaamijyada** hoos ku qoran. | **Qor Haa ama Maya** |
|---|---|
| **1.** Ilmahaaga ama walaalahaaga miyay ka qaybqaataan **Barnaamijka Cunnada Lacag-La'aanta ah iyo Kuwa Lacagtooda La dhimay (FRPM)?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiga FRPM ah sida warqad oggolaansho, codsi la ansixiyay oo leh saxiix barnaamij, ama dukumiinti ka yimid nidaamka rasmiga ah ee diiwaanka barnaamijkaaga.* | |
| **2.** Wakhti xaadirkan miyaad ka qaybqaadataa **Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha (CCAP)?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiyada CCAP sida warqadda Ogeysiiska Go'aanka.* | |
| **3.** Ilmahaagu wakhti xaadirkan miyuu ka diiwaangashan yahay **barnaamijk**a **Head Start**?<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiyada ka qaybgalka Maskax Dhiska sida warqadda aqbalida/oggolaanshaha oo ka timid wakaalada Maskax Dhiska ama foomka isdiiwaangelinta ee la ansixiyay oo leh saxiixa barnaamijka.* | |
| **4.** Wakhti xaadirkan miyaad ka qaybqaadataa **Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP)?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiyada SNAP sida warqad ama bayaan xaaladeed oo ka timid degmadaada, ama dukumeentiyada degmo kale. Nuqul ka mid ah kaarkaaga EBT ma ahan dukumeenti la aqbali karo.* | |
| **5.** Wakhti xaadirkan miyaad ka qaybqaadataa **Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (MFIP)?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiyada MFIP sida warqad ama bayaan xaaladeed oo ka timid degmadaada, ama dukumeentiyada degmo kale.* | |
| **6.** Wakhti xaadirkan miyaad ka qaybqaadataa **Barnaamijka Cunnada Daryeelka Dadka Waaweyn ee Carruurta (CCAP)?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumiintiyada CACFP ee muujinaya ka qaybqaadashada ilmahaaga sida warqad oggolaansho ama codsi la ansixiyey oo leh saxiix barnaamij. Fiiro gaar ah: Qoysasku ma ahan kuwa dakhliga-u-qalma deeqaha waxbarasho ee ku salaysan kaliya u-qalmitaanka aagga bixiyaha ee CACFP. Qoysasku waa inay noqdaan kuwo xaq u leh iyadoo lagu saleynayo dakhligooda gaarka ah.* | |
| **7.** Waqti xaadirkan miyaad ka qaybqaadataa **Barnaamijka Qaybinta Cunnada ee Kaydka Hindida?**<br>*Haddii ay haa tahay, ku soo lifaaq dukumeentiyada Barnaamijka Qaybinta Cunnada sida warqad oggolaansho ama bayaan xaaladeed.* | |

Haddii aad uga jawaabto **haa** mid ama ka badan su'aalaha 1 ilaa 7, ka bood bogogga 7 iyo 8.

*Haddii aad uga jawaabtay **maya** su'aalaha 1 ilaa 7, waxaad u baahan kartaa inaad isticmaasho **Xulashada 2** si aad dakhli u muujiso dakhligaaga.* Buuxi jaantuska *Dadka waaweyn* ee Qoyska iyo dakhligooda ee bogga soo socda waxaadna soo gudbisaa dukumiintiga dakhliga ee saxda ah si dib u eegis loogu sameeyo u qalmitaankaaga.

**Buuxi boggaan** waxaadna soo gudbisaa dukumiintiga dakhliga oo sax ah haddii **aadan** hadda ka qaybqaadanin Xulashada 1 ee barnaamijka bulshada.
**Ka bood boggaan** haddii ada hadda ka qaybqaadato aadna keeni karto dukumiintiyaa mid kamid ah barnaamijyada bulshada ee Xulashada 1aad ee ku qoran Bogga 6.

**Talaabada 1:** Buuxi jaantuska "Dadka waaweyn ee Qoyska iyo dakhligooda."

- Ku qor xubnaha waaweyn ee qoyska (oo aad adigu ku jirto) jaantuska hoose.
- Barnaamijkaan dartiis, xubnaha qoyskaagu waa "qof walba oo kula nool kulana wadaaga dakhli iyo kharashaad, xaataa haddii uusan qaraabo kula ahayn."
    - Xubnaha qoyska waxaa kamid ah dadka ku nool guriga, haddii ay qaraabo yihiin iyo haddii kaleba (sida awoowaha/ayeeyada, qaraabada kale, ama saaxiibada), kuwaas oo uu soo galo dakhli kharashna ka baxo. Qoysaska kuma jiraan dadka kale ee dhaqaale ahaanta ka madax banaan, sida qofka qolka kula degen.
    - Ku dar arday kasta oo koleejka dhigta kaasoo si kumeelgaar ah guriga uga maqan.
    - Ku sar dhamaanba dadka waaweyn, xaataa haddii aysan dakhli haysan.
- Haddii uu dakhli soo galo, soo qor kaliya wadarta guud ee dakhliga. Geli dakhliga(yada) oo xisaa doolar ah.
- Haddii aysan dakhli ka helin meelna, calaamadee sanduuqa "Dakhli Malahan".

**Talaabada 2:** Kusoo lifaaq cadaynta dakhliga qof walba oo qaangaar ah oo qoran. Kusoo dar cadaynta dhamaanba noocyada dakhliga soo galay.

- Cadaynta la aqbali karo waxaa kamid ah foomka W-2 ee sannadkii hore, kii ugu danbeeyay (isku xiga) mushaaraadka 30 maalmood oo ah dakhliga qof walba soo galay, warbixinta kaalmada dhaqaalaha, ama warbixin ka socota loo shaqeeyaha oo ku qoran waraaqda shirkadda.
    - Qoysasku waa inay soo gudbiyaan dukumiintiga ugu danbeeya ee ay markaas hayaan.
    - Mushaaraadku waa inay ahaadaan kuwo ku taariikhaysan lix bilood gudahooda marka abaalmarinta la bixiyo.
    - Haddii noocyada kale ee dukumiintiyada aan la heli karin, dukumiintiyada canshuurta dakhli sanadeedkii lasoo dhaafay ayaa la isticmaali karaa. Dukumiintiyada canshuurtu waa inay ahaadaan koobiga nooca saxiixan ee loo gudbiyay Internal Revenue Service (IRS, Hay'adda Canshuuraha Gudaha) ama waa inuu la socdaa ogaysiiska hubinta haddii si elektoroonik ah loo soo gudbiyay.

Haddii qoysku uusan wax dakhli ah lahayn, mid kamid ah dadka waaweyn ee qoyska ayaa laga rabaa inuu buuxiyo Bayaanka Qoyska ee Dakhli La'aanta ee ku jira Bogga 8.

**Ilaha Dakhliga ee Dadka Qaangaarka ah**

**Wadarta Mushaarka Shaqada**
- Mushaarka, joornaatiga, lacagta abaalmarinta ah (kahor inta aan wax laga jarin ama aan la canshuurin)
- Haddii aad kamid tahay Ciidanka Maraykanka:
    a. Mushaarka aasaasiga ah iyo lacagaha abaalmarinta ah (HA ku darin lacagta dagaalka laguugu siinayo, FSSA ama gunooyinka guryaha ee gaarka ah)
    b. Gunooyinka guryaha marka aad xerada ka maqantahay, dharka iyo cuntada

**Qof Iskiis u shaqaysta ama Beeraley**
- Dakhliga guud ee qofka iskiis u shaqaysta (beer ama ganacsi)

**Taageerada Ilmaha, Alimony**
- Lacagaha taageerada carruurta, lacagaha Alimony

**Dhammaan Dakhliyada Kale**
- Kaalmooyinka Kale ee Lacagta ah ee ka imaanaya Gobolka ama dowladda hoose (ha ku darin wax barnaamijyada Xulashada 1aad ah oo ku qoran Bogga 6)
- Dheefaha shaqo la'aanta
- Magdhowga shaqaalaha
- Dheefaha halyeeynimada
- Dheefaha shaqo joojinta
- Sugnaanta Bulshada, dheefaha naafada
- Dakhliga joogtada ah ee ka imaanaya damaanadqaadeyaasha iyo dhaxalka
- Sannadlaha, Dakhliga maalgashiga, Dakhliga kirada
- Lacagta cadaanka ah ee joogtada ah ee ka imaanaysa meel ka baxsan qoyska

## Xulashada 2aad: Dakhliga Qoyska

## Dadka qaangaarka ah ee Qoyska ka tirsan iyo Dakhligooda (haddii meelo banaan oo kale loo baahdo si loogu qoro magacyo dheeraad ah, ku soo lifaaq waraaq kale)

Jaantuska hoose, saar X sanduuqa ku haboon ee koox kasta.

| Magacyada Dhamaanba Xubnaha Qoyska ee Qaangaarka ah (Koowaad iyo Labaad) | Wadarta Mushaarka Shaqada<br>Ha qorin mushaarkaaga saacadlaha ah.<br>Saar X sanduuqa ku haboon ee koox kasta. | | | | | Ma waxaad tahay Qof Iskiis u shaqaysta mise Beeraley? | | | Taageerada Ilmaha, Alimony | | | | | Dhammaan Dakhliyada Kale | | | | | Ma lihi Dakhli |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Qor dhamaanba xubnaha **qaangaarka** ah ee qoyska (oo aad adigu ku jirto) xitaa haddii aysan dakhli soo xaraynin. Ku dar carruurta sida ku meelgaarka ah uga maqan dugsiga ama kuleejka. | Toddobaad kasta | Labadii todobaadba mar | 2x Bishii | Bil kasta | Soo gudbi dakhliga **kahor inta aan wax laga jarin ama aan la canshuurin** asagoo tiro go'an oo doolar ah (lama rabo sentiyada). ($) | Bil kasta | Sanad kasta | Dakhliga guud ee Beerta ama Qofka Iskiis u Shaqaysta. Meel kale ha kasoo koobiyayn.) ($) | Toddobaad kasta | Labadii todobaadba mar | 2x Bishii | Bil kasta | Lacagaha aad heshay ($) | Toddobaad kasta | Labadii todobaadba mar | 2x Bishii | Bil kasta | Dheefaha howlgabka, shaqo ka fariisiga, naafanimada, shaqo la'aanta, halyeey-nimada, iwm. ($) | Calaamadee haddii qofkan qaangaarka ah aanu dakhli soo galin. |
| 1. | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| 2. | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| 3. | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| 4. | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |
| 5. | | | | | | | | | | | | | | | | | | | |

**Buuxi boggaan** haddii **uusan** jirin xubin qoyska ka mid ah oo qaangaar ah oo dakhli soo galo.
**Ka gudub bogaan** haddii aad isticmaalayso barnaamijka Xulashada 1aad ama haddii mid ama in ka badan oo dadka qaangaraka ah ee qoyskaagu uusan lahayn dakhli.

- Qoysaska aan dakhliga lahayn waxaa wali looga baahan yahay inay ku qoraan dhammaanba dadka qaangaarka ah ee qoyska ka midka ah Bogga 7.
- Ha buuxin boggaan haddii dakhliga mid ama ka badan oo dadka qaangaarka ah aad ku qortay Bogga 7.
- Ha buuxin boggaan haddii aad uga jawaabtay "haa" su'aalaha 1-7 ee Bogga 6 aadnasoo gudbinayso cadaynta ka qaybqaadashada barnaamijka bulshada.

## Bayaanka Cadaynaaya Dakhli La'aanta Qoyska

Warbixintaan hoose waxay ka dhigan tahay bayaankaaga ah inuusan jirin qof qoyska kamid ah oo dakhli soo galo ee Xulashada 2aad. Foomkaan waa inuu buuxiyaa isla waalidka ama mas'uulka sharciga ah ee saxiixaya Codsiga Deeqaha Waxbarashada Xiliga Hore - Pathway II.

**Anigoo ah, ______________________________________________, waxaan cadaynayaa in anagu ka qoys ahaan hadda**
Daabac magaca sharciga ah oo buuxa

**aanaan haysan wa dakhliga ah maalinkaan maanta ah oo ah (BB/MM/SSSS)** ___________________________________.
*Taariikhda Maanta: BB/MM/SSSS*

**Saxiixa**: ____________________________________________ **Taariikhda (BB/MM/SSSS)**: __________________________

# Heshiiska u Hogaansamida shuruudaha

Markii aad codsigaan saxiixdo, waxaad xaqiijinaysaa inaad akhrisay, fahamtay aadna ogolaatay shuruudaha Barnaamijka Deeqaha Waxbarashada Xiliga Hore iyo waxyaabaha hoos ku xusan.

- Macluumaadka codsigaan ku qoran inuu sax yahay, iyo in dhamaan dakhliga xubnaha qoyska aad soo gudbisay. Haddii aan si ula kac ah u soo gudbiyo macluumaad been-abuur ah, ilmahaygu wuxuu weyn karaa deeqda waxbarashada, waxaana waajib igu noqonaysa inaan soo celiyo deeqihii wadanka ee la i siiyay.
- **Ilmahayga 3- ilaa 5-sanno jirka ah** waa inuu maraa Baaritaanka Carruurnimada Hore 90 maalmood gudahooda markuu dhigto barnaamijka uu doortay asagoo isticmaalaya deeqda waxbarashada. Haddii ilmahaygu deeq waxbarasho helo inta u dhexaysa da'da 0 iyo 2 sanno, waa inuu maraa baaritaanka 90 maalmood gudahooda marka la gaaro sanad guurada sadexaad ee dhalashadiisa.
- Ilmahaygu wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu helo deeqda waxbarashada ilaa Ogoosto 31deeda ee sannadka isaga/iyada da' ahaan ugu qalmo dugsiga barbaarinta, ama 5 sanno jirsado Sebteembar 1deeda, haddiiba maalgalinta gobolku diyaar tahay.
- Waxaan ku wargalin doonaa barnaamijka Pathway II markii ilmahaygu joojiyo xaadirista barnaamijka aan deeqda waxbarashada ka helno.
- Waxaan barnaamijka Pathway II ku wargalin doonaa haddii aan guuro ama aan badalo macluumaadkayga xiriirka.
- Soo xaadiris joogto ah oo aan kala go' lahayn ayaa lagaa filayaa. Deeqaha Waxbarashada Xiliga Hore ma ogola wax ka badan 25 maalmood oo maqnaansho ah, 10 maalmood oo xirnaansho la qorsheeyay ah iyo 11 fasaxyada barnaamijka ah. Maalmaha maqnaanshaha ee ka bata 25 deeqda waxbaarshadu ma daboolayso waana inaan anigu iska bixiyaa kharashaadka in ka dhaafis rasmi ah la siiyo ilmahayga(carruurtayda) maahane.
- Haddii barnaamijku uusan ku jirin Parent Aware, waxaa dhici karta inaanan awoodin in aan sii wato Deeqda Waxbarashada ee Xiliga Hore ee barnaamijkaas.
- Haddii aan ahay bixiye daryeelka carruurta qoyska oo ka qaybqaadanaya Parent Aware, waxaan fahamsanahay inaanan awoodin inaan isticmaalo Deeqaha Waxbarashada Xiliga Hore ee ilmahayga anigoo ku isticmaalaya xanaanadayda carruurta qoyska ee shatiga haysata.

## Ogolaanshaha Lagaaga baahanyahay si Macluumaadkaaga Noola Wadaagto

Waa inaad ogolaataa dhamaanba warbixinada si aad uga qaybqaadato barnaamijka deeqda waxbarashada.

- Deeqda waxbarashada/Maamulaha Aaggu wuxuu la wadaagi karaa magaca ilmahayga/carruurtayda, ciwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga, iyo magacayga wuxuuna wax ka qaban karaa sida ugu qoran codsiga, iyo sidoo kale cadad kasta oo deeq waxbarasho ah oo ilmahaygu u qalmo iyo taariikhda abaalmarinta, barnaamijka aan doorto. Arintaan waxaa looga baahanyahay in lagu hubiyo saxnaanta u dhexaysa codsiga iyo macluumaadka barnaamijku helay.
- Deeqda waxbarashada/Maamulaha Aaggu wuxuu la wadaagi karaa magaca ilmahayga/carruurtayda, ciwaanka, taariikhda dhalashada iyo jinsiga, iyo magacayga wuxuuna wax ka qaban karaa sida ugu qoran codsiga: (1) dugsiga degmeda ee deegaankayga, ujeedooyinka ah in ilmahayga la siiyo lambarka Aqoonsiga Ardayga Gobolka ee gaarka ah (SSID) si uu u isticmaalo maamulaha Deeqda waxbarashada/Aagga, iyo (2) Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska ee Minnesota (DCYF) si ay ilmahayga ugu gartaan una siiyaan lacagaha deeqda waxbarashada.
- Gobolka Minnesota waxa laga yaabaa in uu la wadaago macluumaadka aniga iyo ilmahayga/carruurtayda oo ku saabsan u-qalmitaanka iyo isticmaalka deeqaha waxbarasho ee wakaaladaha iyo barnaamijyada kale ee dowladda oo ay ku jiraan, laakiin aanan ku xaddidnayn: Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta (CCAP), shaqaalaha wakaaladda bulshada ee ismaamulka ama Qabiilka, MFIP, SNAP, Head Start, cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban (FRPM), iyo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn Wakaaladahani waxay sidoo kale la wadaagi karaan macluumaadka aniga iyo ilmahayga/carruurtayda ee ku saabsan u-qalmitaanka iyo isticmaalka kaalmada Gobolka Minnesota. Macluumaadkaan waxaa loo isticmaali karaa si loo hubiyo u qalmitaanka dakhliga ee qoyskaygu ku helayo deeqda waxbarashada iyo in lagula socdo isticmaalka deeqaha waxbarashada iyo barnaamijyada kale ee kaalmada bulshada ah. Waxaan fahamsanahay in ogolaanshahayga ku saabsan in macluumaadkayga lala wadaago uu sii shaqaynayo lix bilood kaddib markii deeqdayda waxbarashadu dhamaato.
- Mamaulaha Deeqda waxbarashada/Aaggu wuxuu macluumaadka codsigaan ku jira la wadaagi karaa Gobolka Minnesota kaasoo ay ku jiraan magacayga iyo ciwaankayga; macluumaadkayga bulsho ahaaneed; waxbarashada waalidka; macluumaadka dakhliga; u qalmitaanka ilmahayga iyo cadadka Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka; barnaamijka meesha aan deeqda waxbarashada ka isticmaalayo; lambarka SSID ee ilmahayga; iyo inay ii dhanyihiin shuruudaha barnaamijku iyo in kale. Macluumaadkaan waxaa loogu baahanyahay si dib u eegis loogu sameeyo u qalmitaanka, fulinta barnaamijka, wuxuuna muhiim u yahay u hogaansamidda sharciga gobolka ee ogolaanaya barnaamijka.
- Si loo hubiyo in baaritaanka carruurnimada xiliga hore uu dhacay, Maamulaha Deeqda waxbarashada/Aaggu wuxuu haystaa ogolaanshahayga si uu ula xiriiro xaafiiska dugsiga degmada ee ilmaha si uu u hubiyo wakhtiga iyo goobta baaritaanku ka dhacay.

**Fiiro gaar ah:** *Kuma khasbani inaan ogolaado inaan macluumaadkayga la wadaago, laakiin hadaan go'aansado inaanana la wadaagin, waxaan fahamsanahay in ilmahayga/carruurtaydu aysan xaq u yeelanayn inay helaan Deeqda waxbarashhada Xiliga Hore. Macluumaadka la gudbinaayo kuma jiraan dukumiintiyada cadaynta ah ee ku lifaaqan codsigaan.*

# Digniinta Tennessen ee ka imaanaysa Gobolka Minnesota

Ogaysiiskaan wuxuu khuseeyaa dhamaanba macluumaadka laga ururiyo barnaamijka Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka. Wuxuu sharaxayaa macluumaadka la ururinaayo iyo sababta aan u ururinayno.

**Waa maxay macluumaadka aan dalbanayno?**
Waxaan dalbanaynaa dhammaanba macluumaadka ku saabsan Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka - codsiga barnaamijka Pathway II, kaasoo qaarkiis loo arko xog gaar ah marka loo eego sharciga Minnesota.

**Maxay tahay sababta aan kaaga dalbanayno Macluumaadkaan?**
Macluumaadka ku saabsan codsigaan waxaa loogu baahanyahay in loo isticmaalo Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka. Waxaan u isticmaali doonaa macluumaadka halkaan lagu ururiyo, iyo macluumaad kasta oo kale oo la xiriira, si aan go'aan uga gaarno u qalmitaanka maalgalinta. Macluumaadkaan waxaa loogu baahanyahay u hogaansamidda sharciga gobolka ee ogolaanaya barnaamijka.

**Ma waajib bay igu tahay inaan xogtaan bixiyo?**
Majiro sharci kugu waajibinaaya inaad bixiso xogta lagaa dalbaday; hase haatee, la'aanteed, go'aan kama gaari karno u-qalmitaanka ilmahaaga, ilmahaaguna ma heli doono deeqda waxbarashada.

**Yaa kale oo arki kara macluumaadkaan?**
Sidii aan kusooo faahfaahinay codsiga, markii la helo ogolaanshahaaga lagaaga baahanyahay waxaan macluumaadkaaga la wadaagi doonnaa barnaamijka ada doorato, dugsiga degmada aad degentahay, iyo Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska Minnesota. Haddii aad bixiso ogolaanshahaaga aan khasabka ahayn, dhinac sadexaad ayaa adeegsan doona macluumaadkaaga markii la qiimaynayo waxtarka barnaamijka deeqda waxbarashadu u leeyahay gobolka. Dhamaanba dhinacyadaanu, oo ay ku jiraan qiimeeyuhu, waxaa qabanaya habraacyada iyo shuruucda dhowrsanaanta xogta ee Minnesota lamana wadaagi doonaan xogtaada qarsoon cid kale marka laga reebo sida ku cad halkaan ogolaanshaha. Qofka qiimaynta samaynayaa waa inuusan xogtaada la wadaagin qof aan ka ahayn DCYF. Waxaa laga yaabaa inaan sidoo kale xogta aad na siisay siino Hanti-dhowraha Baralamaanka, Waaxda Adeega Bulshada ee Minnesota, iyo/ama hay'adaha kale ee u haysta awoodaha sharciga inay sharciga adeegsadaan, ama qof walba oo maxkamad u ogolaatay.

**Sidee kale oo macluumaadkaan loo adeegsan karaa?**
Waxaan u isticmaali karnaa ama cid kale ugu gudbin karnaa macluumaadkaan kaliya qaabka ku xusan ogaysiiskaan, inaad na siiso ogolaanshahaaga oo qoraal ah oo aan xogta kusoo gudbinayno maahane taasoo ku saabsan ujeedo kal ama inaan u gudbinayno shakhsi ama dhinac kale. Macluumadaka waxaa loo adeegsan karaa ujeedo kale haddii Baarlamaanka Maraykanku ama Baarlamaanka Minnesota ay meelmariyaan sharci ogolaanaya ama waajibinaya isticmaalkiisa.

**Ilaa intee ayaa xogtayda la sii hayn doonaa?**
Xogtaada waxaa la hayn karaa ugu yaraan toddobo sanno.

## Oggolaanshaha Ikhtiyaariga ah: Shaacinta Macluumaadka iyo Ka qaybqaadashada Qiimaynta

Fadlan saxiix si aad u xaqiijiso inaad akhriday, fahamtay aadna aqbashay waxyaabaha soo socda.

___ Mamaulaha Deeqda waxbarashada/Aaga ama Gobolka Minnesota wuxuu macluumaadka ku jira codsigayga, u qamitaanka cunugayga ee cadadka Deeqda Waxbarashada Dhallaanka, iyo barnaamijka aan deeqda waxbarashada ka helo, la wadaagi karaa qiimeeyeyaasha barnaamijka Gobolka Minnesota ee loo ogolaaday ayadoo ujeedadu tahay in la taxliiliyo sida maalgalinta loo isticmaalay, qaabka qoysaska loola socodsiiyay barnaamijka, saamaynta barnaamijku ku leeyahay joriinka ilmaha ama u diyaar ahaanshaha dugsiga, tayada barnaamijyada waxbarashada xiliga hore ee barnaamijka la adeegsanayo, iyo qiimaynada kale ee loo arko inay khuseeyaan Gobolka Minnesota. Ma jirto warbixin dadweyne oo lagu daraayo macluumaad si gaar ah loogu garan karo ilmo gaar ah.

## Saxiixa Waalidka/Mas'uulka

Markii aad hoos saxiixdo, waxaad oggolaanaysaa oo aad xaqiijinaysaa dhammaanba waxyaabaha soo socda:

1. Waxaan xaqiijinayaa in aan ahay waalidka ama mas'uulka sharciga ah, in dhammaan macluumaadka codsigaan ku jiraa uu yahay mid sax ah, dakhliga dhammaan xubnaha qoyskana aan soo gudbiyay. Waxaan xaqiijinayaa in haddii aan macluumaad been-abuur ah gudbiyo, ilmahayga/carruurtaydu waayi karaan deeqda waxbarashada, aana u baahan doono inaan gobolka usoo celiyo lacagtii horey la ii siiyay.
2. Waxaan aqbalay shuruudaha barnaamijka ee ku qeexan bogga Heshiiska u Hogaansamidda Shuruudaha.
3. Waxaan aqbalay in macluumaadkayga iyo/ama macluumaadka ilmahayga lala wadaago sida ku cad Ogolaanshaha Waajibka ah si cid kale loola Wadaago Macluumaadkaaga.
4. Waxaan aqbalay inaan akhriyay oo fahmay Digniinta Tennessen.

### Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka Sharciga ah

Ku saxiix khadda buluuga/madoowga ah ama si elektoroonik ah, lama rabo qalin goome.

* Magaca Waalidka/Mas'uulka Sharciga ah: ____________________________________________

*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*

*Saxiixa: ______________________________ *Taariikhda (BB/MM/SSSS): ________________

Soo gudbi codsigaaga buuxa iyo dukumiintiyada u qalmitaanka ee barnaamijkaaga Pathway II.

## Saxiixa/Taariikhda Hubinta Abaalmarinta ee Wakiilka Barnaamijka

Waxaan garowsanahay in macluumaadka la iiga baahanyahay ee Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka - Codsiga Pathway II dib u eegis lagu sameeyay lana cadeeyay inuu yahay mid sax ah marka loo eego ujeedada abaalmarinta deeqda waxbarashada Pathway II ee barnaamijkaan. Waxaan sidoo kale qirayaa in aan ka wadahadalnay xulashooyinka Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka iyo dheefaha qoyska iyo inay aqbaleen deeqda waxbarshada ee Pathway II ee kaga imaanaysa barnaamijkeena.

*Magaca Wakiilka Barnaamijka: ____________________________________________

*Koobaad* *Dambe*

*Saxiixa: ______________________________ *Taariikhda: ______________________

*Taariikhda Hubinta Abaalmarinta - BB/MM/SSSS*

*Magaca Barnaamijka Pathway II: ____________________________________________

*Magaca Goobta (haddii ay khusayso): ____________________________________________

*Ilmaha 1aad Taariikhda Bilaabashada Abaalmarinta: __________ *Cadadka Abaalmarinta Ilmaha 1aad: __________

Ilmaha 2aad Taariikhda Bilaabashada Abaalmarinta: __________ *Cadadka Abaalmarinta Ilmaha 2aad: __________

Ilmaha 3aad Taariikhda Bilaabashada Abaalmarinta: __________ *Cadadka Abaalmarinta Ilmaha 3aad: __________

Haddii ada u codsanayso wax ka badan hal canug, halkaan ku qor kuna soo lifaaq boggaan Codsiga Deeqda Waxbarashada ee Waxbarashada Dhallaanka - Pathway II. Ha gelin mar labaad macluumaad ku saabsan Ilmaha Koowaad oo ku jira Bogga 1aad ee codsigaan. Haddii aad u codsanayso wax ka badan saddex carruur ah, nuqul ka samee boggan oo codsigaaga ku soo lifaaq xaashida(yada) dheeraadka ah.

## Ilmaha Labaad

*Magaca Sharciga ah ee Ilmaha: ______________________________

*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha (BB/MM/SSSS):______________________________

*Jinsiga Ilmaha (mid calaamadee): ◯ Lab ◯ Dheddig

Ilmahaan miyuu ku jiraa Xanaanada Barbaarinta?: ◯ Haa ◯ Maya

Isirka (*mid calaamadee*): ◯ Hispanic/Latino ◯ Hispanic/Latino Aan ahayn

*Qolada (calaamadee dhammaan inta ku habboon)*
☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaskaanka
☐ Aasiyaan
☐ Madoow ama Afrikaanka Mareykanka
☐ U dhashaya Jasiirada Baasifiga ama Dhaladka reer Hawai
☐ Caddaan

Ilmahaan miyuu helay Baaritaanka Carruurnimada Hore? ◯ Haa ◯ Maya

*Haddii ay haa tahay:* Goobta: ______________________________ Taariikhda: ______________

## Ilmaha Saddex

*Magaca Sharciga ah ee Ilmaha: ______________________________

*Koobaad* *Dhexe* *Dambe*

*Taariikhda Dhalashada Ilmaha (BB/MM/SSSS):______________________________

*Jinsiga Ilmaha (mid calaamadee): ◯ Lab ◯ Dheddig

Ilmahaan miyuu ku jiraa Xanaanada Barbaarinta?: ◯ Haa ◯ Maya

Isirka (*mid calaamadee*): ◯ Hispanic/Latino ◯ Hispanic/Latino Aan ahayn

*Qolada (calaamadee dhammaan inta ku habboon)*
☐ Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaskaanka
☐ Aasiyaan
☐ Madoow ama Afrikaanka Mareykanka
☐ U dhashaya Jasiirada Baasifiga ama Dhaladka reer Hawai
☐ Caddaan

Ilmahaan miyuu helay Baaritaanka Carruurnimada Hore? ◯ Haa ◯ Maya

*Haddii ay haa tahay:* Goobta: ______________________________ Taariikhda: ______________

## Tilmaamaha U-qalmitaanka Dakhliga:
## Dhaqangalaya Oktoobar 2025-Oktoobar 2026

Si aad ugu qalanto deeqda waxbarasho ee Waxbarashada Dhallaanka, dakhliga guud ee sanadlaha ah ee qoyskaaga waa inuu noqdaa mid ka yar ama la mid ah boqolkiiba 85 Dakhliga Dhexe ee Gobolka (SMI), sida lagu muujiyay jaantuska. Shaxdaan waxay ku salaysan tahay Dakhliga Celceliska Gobolka waxaana loo adeegsadaa abaal-marinaha laga bilaabo Oktoobar 13, 2025, ilaa Oktoobar 2026. Jaantuska waxaa la cusboonaysiin doonaa bisha Oktoobar 2026.

Qoysaska leh dakhliga guud ee sanadlaha ee reerka ee ka yar ama la midka ah 47% Dakhliga Dhexdhexaadka Gobolka (SMI), sida lagu muujiyay jaantuska, ama ay la socdaan dukumiintiga kaalmada ee laga helo barnaamijka uu maalgeliyo gobolka ama dowladda federaalka ee la ansixiyey, waxay heli doonaan mudnaanta la siiyo qoysaska dakhligoodu ka weyn yahay 47% iyo uu ka yar yahay ama la egyahay 85% Dakhliga Dhexdhexaadka ee Gobolka (SMI).

| Tirada Qoyska | Dakhliga sannadlaha ah ee uu u qalmayo (85% Dakhliga Celeclsika Gobolka) | Dakhliga sannadlaha ah ee madnaanta yeelanaya (47% Dakhliga Celceliska Gobolka) |
|---|---|---|
| 2 | $83,231 | $46,022 |
| 3 | $102,814 | $56,850 |
| 4 | $122,398 | $67,679 |
| 5 | $141,982 | $78,508 |
| 6 | $161,565 | $89,336 |
| 7 | $165,237 | $91,367 |
| 8 | $168,909 | $93,397 |
| 9 | $172,581 | $95,427 |
| 10 | $176,253 | $97,458 |
| 11 | $179,925 | $99,488 |
| 12 | $183,597 | $101,519 |
| 13 | $187,269 | $103,549 |